



Dayrta 2020: Waxa Ardayda iyo Qoysasku ay Tahay inay ka Ogaadaan Imaanshaha

2 da Sibteembar, 2020

Aad ayaanu ugu faraxsanahay inaanu aragno ardaygaaga oo dugsiga ku laabanaya sanadkan. In kastoo aanaan si fool-ka-fool ah u arki karin, waxaanu ka wada xiriiri doonaa maqal iyo muuqaal anagoo adeegsanayna waxbarashada onlaynka ah. Aad ayey muhiim u tahay in ardaydu xaadiraan oo kaqaybqaataan fasalada. Waxaanu rabnaa inaanu bixino qaabab badan oo macallimiintayadu ula socon karaan imaanshaha ilmahaaga ee waxbarashada. Waxaad ka heli kartaa dhawr qaab hoos. Fadlan dib isula eeg adiga iyo ardaygaagu oo fadlan ku adkee muhiimadda kaqaybqaadashadiisa iyo kaqaybgalkiisa dugsiga sanadkan. Ku sii mahadsanid iskaashiga aad nala samaynayso muddada waxbarashada onlaynka ah socoto.

Ardaydu waxay haystaan 24 saacadood (laga bilaabo 12:01 g.h. ilaa 11:59 g.d.) si ay ugaga qaybqaataan mid kamid ah qaababka soo socda:

- Kaqaybqaadashada fasalada maqal iyo muuqaalka ah.
- Xiriirka ka imanaya ardayda ee macallinka imanaya ee wada-sheekaysiga onlaynka ah, farriinta qoraalka ah, app-ka xiriirka, ama iimeyl.
- Wicitaan taleefan oo dhexmaraya macallinka ama EA/Kaaliyaha Macallinka iyo ardayga, ama, marka la eego ardayda yaryar, waalidka iyo iyaga (macallinka) dhexmaraya.
- Soo dhigista shaqada koorsada nidaamka maaraynta waxbarashada ama dagalka web-ka kusalaysan ama iimeyl ku dirista.
- Soo dhiibidda shaqada koorsada oo dhammaystiran maalinta loo qabtay.

Fadlan ogow in ardayda fasalada 6-12 ay xaadiraan mid kamid ah qaababka sare ku xusan fasal kasta oo la muddeeyey maalin gaar ah.

Faham faraq u dhexeeya waxbarashada isku mar dhacaysa iyo ta wakhtiyo kala duwan dhacaysa, fadlan ka fiiri [dokumentigayaga qaabka Dhigista Waxbarista](#).

Macluumaadkii ugu dambeeyey ee kusaabsanaa bilaabidda sanad dugsiyeedka si aad u hesho, booqo [websaytka Dayrta 2020](#).